

## Iskaan Garee Koodhka QR

### Waa maxay koodhka QR?

Koodhka QR waxaa weeye baarkoodhka aad ku iskaan garayn karto taleefankaaga.

- Caadiyan, koodhka QR waxa ay ku gayn kartaa websayt gaar ah.
- Mararka qaar, isticmaal koodhka QR si aad ugu xidhiidhiso Wi-Fi.
- Wuxuu aad iskaan garayn kartaa koodhka QR si aad u qabsato balanta talaalka.
- Wuxuu aad ka arkaygaa koodhka QR-ka maqaaxida, tukaamada, xafiiska dhakhtarkaaga, farmsiga, iyo calaamadaha.

### Miyaa koodhka QR yahay amaan in la iskaan gareeyo?

Mararka qaar, koodhka QR-ku waxa uu ku gayn karaa websaytyo khatar ah.

Si aad si amaan ah ugu isticmaasho QR koodhka:

- kaliya waxa aad iskaan garaysaa QR koodhka hay'adaha aad garanayso.
- ha iskaan garanaynin QR koodhka hadii ay ku yalaaan waraaqo.
- kahor inta aanad taaban websaytka, eeg cinwaanka. Xaqiji in ayna lahayn xarfo khalad ama dheeraad ah

### Sidee ayaan u iskaan gareeyaa QR koodhka?

Mararka qaar, waxa aad isticmaali kartaa kameerada taleefankaaga. Wuxuu aad sidoo kale isticmaali kartaa app, sida:


- Google Lens
- Iskaanka Baarkoodka Iskaanka QR

Hadii aanad haysan taleefan casri ah, waxa aad ka dalban kartaa qof cinwaanka websaytka QR koodhku uu ku gaynayo.



Marka aad isticmaalayso kameerada taleefanka:

**1. Fur kameerada taleefankaaga**



**2. Waxa aad ku jeedisaa kameerada QR koodhka si aad ugu aragto shaashadaada (kameeradaada ayaa iskaan garayn doonta QR koodhka. Lagaagama baahna inaad ka qaado sawir.)**



**3. Taabo linkiga websaytka ee aad ka aragto shaashadaada**



**4. Boga ayaa ka furmi doonaa aaladaada**

